JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA EE FEDERAALKA ITOOBIYA QORSHAHA HORUMARKA EE SHANTA SANO (1998-2002)

DOKUMANTI LA SOO KOOBAY SI LOOGU WACYIGELIYO QAYBAHA AY QUSEYSO OO AY DIYAARISAY HAY'ADDA PANE

(Popular Version of PASDEP)

POVERTY ACTION NETWORK OF CIVIL SOCIETY ORGANIZATIONS IN ETHIOPIA (PANE)

TAHISAAS 2000
ADDIS ABABA

1. Hordhac

Qoraalkaan kooban waxaa diyaarisay hay'adda isbahaysiga ururrada bulshada rayadka Itoobiya (PANE) ee ka shaqeeya howlaha la xidhiidha dhimista saboolnimada si qaybaha kala geddisan ee ay arrintaani quseyso sida xubnaha fulinta ee kala geddisan iyo qaybaha kale ee bulshadaba loogu wacyi geliyo.

Dokumantigan waxuu ahmiyadda koobaad uu siinayaa maamullada ugu hooseeya ee ay ka soo fulaan go'aannada siyaasadda, dhaqaalaha iyo maamulka. Nidaamka fadaraaliga ee uu ku dhaqmo dalkan Itoobiya wuxuu sameeyey in awooddi go'aamineed ee ku ursursaneyd awoodda sare ee dowladda loo daadajiyo maamullada ugu hooseeya ee dalka ka jira.Waxaanna ku rajo weyn nahay dokumantigan la soo koobay inuu noqon doono mid qaybaha maamulka ee dalka ugu hooseeya ee leh awoodda qorshe dejinta, guddiga fulinta iyo qaybaha kalaba ka caawin doona inay fahmaan qorshe-hawleedka iyo Istiraatiijiyadda dowladda oo ay diyaarinta qorshaha horumarka iyo daba galkiisuba ay uga duulaan Wareegga labaad ee barnaamijka hoos u dhaadhicinta maamulka ee la billaabay sanad miisaaniyadeedki 1995; wuxuuna degmooyinka dalka oo dhan awood uu u siiyey inay diyaarsadaan miisaaniyadaha degmooyinka, miisaaniyadda loo qoondeeyeyna ay u isticmaalaan si waafaqsan baahidooda sida ay u kala horreyso.

Ujeeddada ugu muhiimsan ee dokumantigaan waxaa weeye qorshaha dhimista saboolnimada iyo horumarka degdegga ee waara (PASDEP) 5ta sano si loo hirgeliyo isla-markaana loo daba galo oo ay dadka ka faa'ideysanaya si wanaagsan u fahmaan. Dokumantiganna waxaa si kooban loogu faahfaahiyey qorshaha 5ta sano, waxuuna ka kooban yahay, waxtarka uu qorshuhu leeyahay, fikirka aasaasiga u ah, ujeeddooyinkiisa iyo istiraatiijiyadaha ugu muhiimsan.

2. Fikirka aasaasiga ee qorshaha, Ujeeddooyinkiisa iyo Istiraatiijiyadaha ugu muhiimsan

2.1. Fikirka aasaasiga ee qorshaha

Qorshaha horumarka ee 5ta sano waxaa laga diyaariyey barnaamijka dhimista saboolnimada iyo horumarka waara (SDPRP) ee la hirgeliyey 1995-1997.Wakhti xaadirkanna himilada Itoobiya waxaa weeye "20ka ilaa 30ka sano ee soo socda in loo abuuro Itoobiya rabitaanka iyo ka qayb

galka shacabka lagu soo dabbalay nidaamka dimoqraadiyadda, maamulka suubban, caddaalad bulshada dhexdeeda, saboolnimadana ka baxday oo dakhligeeduna uu dhexdhexaad yahay. Qorshahan waa wareeggii koowaad ee qorshaha dhimista saboolnimada ee 5ta sano oo hordhac u noqonaya hirgelinta qorshaha horumarinta qarniga (MDGs). Himilada dhaqaalaha ee dalku wuxuu dhigayaa qodobbadan soo socda:

- Dalka inuu noqdo dal wax soo saarka dhinaca beeraha oo casri ah ku hormaray wax soo saarka iyo taknooloojiyad aad u sarreysa sidii dhaqaalaha dalka uu door muhiim ah uga qaadan lahaa oo loo gaadhi lahaa dhaqaale kobacsan oo warshadaha ku xidhan;
- Dal gaadhay horumar dhaqaale oo waara isla-markaana caddaalad ku dhisan iyo
- Inuu dalku gaadho dakhliga shaqsiga muwaaddinka soo gaara marka dakhliga guud ee dalka loo qaybiyo (per-capita income) dalalka uu dakhligooda dhexdhexaadka yahay.

2.2. Ujeeddada qorshaha

Ujeeddada ugu muhiimsan qorshahan horumarinta waxaa weeye in kobaca dhaqaalaha la xoojiyo isla markaana kororkaasi laga dhigo mid waara si shacabka qaybahiisa kala geddisan uu uga faa'iideysto; si loo hirgeliyo yoolka qorshaha horumarka qarnigana (MDGs) in la helo horumar natiijo wanaagsan leh.

2.3. Istiraatiijiyadda ugu muhiimsan qorshahan

Istiraatiijiyadda qorshaha horumarka ee 5ta sano wuxuu ahmiyadda koowaad uu siinayaa istiraatiijiyadahan muhiimka ah ee hoos ku xusan ee udub dhexaadka u ah qorshahan:

b) Kobcinta awoodda fulinta ee qaybaha kala geddisan

t) In la abuuro koror dhaqaale oo deg deg ah, waara isla-markaana sal ballaadhan.

j) In la raaco nidaam la isugu dheelli tiri karo korodhka shacabka iyo korodhka dhaqaalaha.

x) In la abuuro fursad lagaga faa'ideysan karo awoodda ballaadhan ee ay haweenka dalka leeyihiin.

kh) In la ballaadhiyo isla-markaana la xoojiyo qaab dhismeedka horumarka aasaasiga ee dalka.

d) In la sii wado sii xoojinta horumarinta xoogga shaqaaale ee dalka

r) In fursada shaqo la abuuro

s) Joojinta amaba xakameynta cabsida iyo xasilooni darrada ka iman karto ku waxyoolloobidda masiibooyinka

2.3.1. Kobcinta awoodda fulinta oo dhinac kasta ah

Dowladda waxyaabaha ay aaminsan tahay inay gundhig u yihiin kobcinta nidaamka dimuqraadiyadda ee lagu kobcinayo awoodda fulinta waxay u diyaarisay barnaamijyo waafaqsan istiraatiijiyadaha horumarka. Ujeeddooyinkaasi waxaa la hirgelin karaa marka la adkeeyo hay'adaha dimuqraadiyadda, in la fuliyo nidaamka wax lagaga baddalayo nidaamka shaqaalaha dowlada (civil service) iyo in wax laga baddalo nidaamka caddaaladda ee dalka.Waxaa sida oo kale qaybtan hoos tagaya kobcinta awoodda degmooyinka, kobcinta Teknooloojiiga warisgaarsiinta (ICT) iyo in la taageero shirakadaha dhismaha.

2.3.2. In la abuuro koror dhaqaale oo degdeg ah, waara isla-markaana sal ballaadhan

Abuuridda koror dhaqaale oo deg deg ah, waara, isla-markaana sal ballaadhan waxaa lagu wajahayaa laba arrimood. Kuwaas oo kala ah:

- Horumarinta beeraha ee ku saleysan suuqa
- In la dedejiyo kobaca dhaqaalaha shirkadaha yaryar ee ay dadka sida gaar ah u leyihiin.

B) Horumarinta beeraha ee ku saleysan suuqa

Si loo hirgaliyo horumarinta beeraha ee suuqa ku saleysan waxaa kaalin aad u weyn ka qaadanaya arrimahaan hoos ku xusan**:**

- In la dhiso waddooyin roob iyo roob la'aanba la mari karo oo xiriiriya beeraha iyo suuqa.
- In la ballaadhiyo adeegga lacagaha lagu amaahinayo beeraleyda yar yar si ay wax soo saarka beerahooda ay ugu horumariyaan
- Goobaha iyo beeraha casriga ah ee sida gaar ah loo doortay oo cimilada dalka oo dhan ka tarjumaya in laga fuliyo Fidinta beeraha.
- In heer qaran loo diyaariyo suuq/qorshe iyo saraci ama waxyaabihi wax soo saarka beeraha loo adeegsan lahaa iyo waxyaabaha suuqyada dibadda loo iib-geeyo sida ubaxa, khudradda, iwm…lagu soo saari lahaa.
- In la balaadhiyo horumarinta waraabka iyada oo laga faa'ideysanayo biya xireennada dalka ka jira
- Kax ka baddalidda soo dhaweynta saraca iyo bacraminto

- In la qaado tallaabbooyin lagu xaqiijinayo dammaanadda lahaanshaha dhulka haddii ay suurtagal tahayna deegaannada dalka ugu habboon laga diyaariyo dhul beereed aad u ballaadhan.

T) In la dedejiyo kobaca dhaqaalaha shirkadaha ay dadka sida gaar ah u leyihiin

T.1) Xoojinta xarumaha addeegga bixiya ee soo jiidan kara niyad samida

Shaqsiyaadka shaqooyinka abuuri kara

- In wax laga baddalo nidaamka shati bixinta lana dedejiyo
- In la adkeeyo nidaamka dabagalka fursad ku habboonna loo abuuro, oo ay ka mid yihiin xaaladaha maxkamadaha ee lagu xaqiijinayo lahaanshaha hantida oo wax laga baddalo, in la abuuro nidaam tartan oo xor ah iyo xaqiijinta heshiisyada qandaraasyada sida ay u fulaan.
- Nidaamka maaliyadda oo wax laga baddalo si kor loogu qaado raasumaalka ay shaqsiyaadka ku shaqeystaan iyo howl fulintaba.
- Lahaanshaha iyo dammaanadda dhulka la xidhiidha oo wax laga baddalo si loo dhiirragaliyo maalgelinta iyo ganacsiga.
- Horumarka aasaasiga oo la ballaadhiyo isla-markaana la sii xoojiyo.
- Barnaamijyada waxbarashada, xirfadda iyo farsamada gacanta oo la ballaadhiyo si xirfadda shaqaalaha dalka sare looga qaado
- In dhaqaalaha dalka laga dhigo mid xasiloon iyada oo la isku dheelli tirayo sarrifka lacagaha, si loo xakameeyo kor u kaca qiimaha ama gebi ahaanba loo joojiyo.

T.2) Ka faa'ideysiga fursadaha ka bannaan ganacsiga dibadda

Ganacsiga dibadda si looga faa'ideysto waxaa loo baahan yahay in dalxiiska la ballaadhiyo, khayraadka xoolaha oo la hormariyo iyada oo fiira gaar ah la siinayo tayada, in si ballaadhan loo soo saaro khudradda iyo miraha kala duduwan iyo weliba ubaxa, in taageero loo fidiyo howlaha lagu horumarinayo warshadaha dharka sameeya iyo in macdinta la hormariyo.

Gabagabada qorshahan (sanadka 2002) dakhliga ganacsiga dibadda uu dalku soo saaro si loo gaarsiiyo yoolka la rabo oo ah in wax soo saarka dalka la gaarsiiyo15-20% waa in dhiisha dhinac la isaga dhiga oo shaqo adag loo soo jeestaa.

J) In la raaco Istiraatiijiyada ku saleysan xaaladda Juqraafiyadeed

Si looga hortago hanti beeradaroowda oo loo qabto howlo horumar oo natiijo wacan laga soo hoyo, gobollada horumarka laga fulinayo waa in loo qaybiyaa si waafaqsan xaaladdooda juqraafi

ee ay ku sugan yihiin (sida cimiladooda iyo dhulka gobolladaasi sida uu u yaallo) kaddibna gobol kasta horumarka ku habboon loo diyaariyaa.

X) In la xoojiyo Ajandooyinka Horumarinta Magaalooyinka ee ugu muhiimsan iyo in la adkeeyo xiriirka miyi iyo magaalo ka dhaxeeya

- Adkeynta maamulka dowladaha hoose iyo maamullada xafiisyada kala duduwan
- Horumarka aasaasiga ee looga baahan yahay magaalooyinka oo maaliyad adag lagu bixiyo si horumarka magaalooyinka loo xoojiyo.
- Raadinta isla-markaana adeegsiga ilaha dhaqaale ee aan miisaaniyadda dowladda culeyska saareynin.
- Wax ka baddalidda maamulka iyo bixinta boosaska magaalooyinka. Maadaamaa ay taasi keeni karto inay dhiirrageliso shaqsiyaadka iyo qoysaskuba inay hanti sameystaan maadaamaa ay hantidaasi dammaanad qaadeyso.
- Ballaadhinta boosaska magaalooyinka ee warshadaha ku habboon. Xiriirka ka dhaxeeya miyi iyo magaalo oo la adkeeyo si wada jir ahna looga faa'ideysto waxay gacan ka geysanaysaa howlaha dalka ka socda ee saboolnimada lagu dhimayo.Markaasi waxaa loo baahanayaa in suuqyada la isku xidho, xoogga shaqaale oo si xor ah isaga goosha miyi iyo magaalo iyo magaalooyinka iyo dhulka miyiga ee ku hareereysan oo loo abuuro ila dakhli oo ay ku abuuran karaan oo ku filan.

KH) Deegaannada xoola dhaqatada oo fiira gaar ah la siiyo

Dalka Itoobiya waxaa ku dhaqan bulsha xoola dhaqata ah oo ay tiradooda kor u dhaafeyso 12-15 malyuun oo ku kala nool 7 deegaan oo dalka ka mid ah. Bulshada xoola dhaqatada ah maadaamaa aysan meel si joogta ah u dageynin waxaa adag in adeegga ay u baahan yihiin ay helaan taasoo deegaannada xoola dhaqatada ka dhigtay deegaannada ay saboolnimada sida weyn uga baahsan tahay.Sidaa darteed, qorshahan waa qorshe xoola dhaqatada si gaar ah looga diyaariyey. Qorshaha waxbarashada ku saabsan waxaa lagu saleynayaa isla-markaana loo diyaarinayaa si waafaqsan hab noololeedka bulshada xoola dhaqatada.Adeeg caafimaad si ay u helaanna waxaa la diyaarinayaa xaruma caafimaad oo xoola dhaqatada la guura hadba meesha ay u guuraan. Waxaana si gaar ah loo diyaarin hayaa qorshooyin ku saabsan adeegga caafimaadka xoolaha, dhaqashada xoolaha, suuq geynta xoolaha iyo nidaamka ka hortagga masiibooyinka. Xilliga ay deegaannadaasi roobabku ka da'eyn si ay biya nadiif ah oo ay cabbaan u helaan waxaa

loo dhisayaa adeeg biyo oo ku filan.Bulshada xoola dhaqatada ah noolashooda si wax looga baddalo noolosha hadda ay ku nool yihiin oo ay mustaqbalkana ay hal meel ugu sugnaadaan waxaa loo dhisayaa adeegyada horumarka aasaasiga u ah oo ay ka midka yihiin waddooyinka, isgaarsiinta iyo waraabka yaryar, iwm…

2.3.3. <u>In la is-waafajiyo korodhka tirada shacabka iyo korodhka (kobaca) dhaqaalaha</u>

Dadaalka loogu jiro hirgelinta istiraatiijiyadaha arrimaha dadweynaha ee heer qaran waxaa la barbar wadayaa in la sii xoojiyo adeegga qorashaha qoyska. Qorshuhuna maadaamaa uu aaminsan yahay la dagaallanka dhaqamada xunxun iyo gabdhaha oo waxbarashada laga qayb galiyo inay waxtar aad u weyn ay u leeyihiin hirgelinta ujeeddooyinka iyo yoolka barnaamijyada dadweynaha ahmiyad aad u weyn ayuu siinayaa.

2.3.4. <u>In la abuuro fursad lagaga faa'ideysan karo awoodda ballaadhan ee ay leeyihiin haweenka dalka</u>

- Ujeeddada qorshahan waxaa weeye gabdhaha inay dugsiyada waxbarashada ay si ballaadhan u galaan oo ay waxbarashadoodana u dhammeeyaan si gabagabada qorshahan ay tirada gabdhaha ay tan wiilasha ula sinnaato.
- Waxaa dadaal adag loo galayaa caafimaadka haweenka sidi loo daryeeli lahaa iyada oo xirfadlayaal caafimaad oo haween ah looga howl galin lahaa ilaa heer tuulo ilaa iyo qoys. Dalka oo dhanna waxaa laga fulinayaa qorsha lagu xaqiijinayo caafimaad qabka dhalmo iyo uurka hooyooyinka.
- Ilaa iyo sanadka 2002 85% shacabka sidi ay adeegga biyaha nadiifka uga heli lahaayeen masaafo ka yar kilo miitir badhkii ayaa la sameynayaa si loo dhowro wakhtiga faraha badan ee gabdhaha iyo haweenkaba kaga gubto biyaha ay meelaha fog fog ka soo dhaamiyaan.
- In la sii xoojiyo xarumaha fursadaha shaqo u abuuri kara haweenka miyiga ku dhaqan.
- Waxsoo saarka dhinacyada sida Fidinta beeraha, amaahinta lacagaha, daryeelka khayraadka dabiiciga iyo ganacsiga yar yar iyada oo qorshooyinka iyo barnaamijyada arrimahaasi la xidhiidha ahmiyadda koowaad lagu siinayo haweenka.
- In la sii wado sii xoojinta shuruucda iyo xarumaha ilaalinaya isla-markaana dhowraya xuquuqda haweenka iyo fursadaha ay leeyihiin.

2.3.5. <u>In la sii xoojiyo dhismayaasha horumarka aasaasiga ah</u>

B) Waddooyinka

Sida uu qorshahan dhigayo ilaa iyo 2000 waxaa dalka laga dhisayaa waddooyin cusub oo ay dhererkoodu kor u dhaafayo 20,000 (oo 90% dhulka miyiga ku yaall). Sida oo kalana waddooyinka dalka ka jira 84% waxaa lagu sameynayaa dayactir si ay u bixiyaan adeeggii loogu tala galay. (Horumarinta waddooyinka si aad u fahanto eeg lifaaqa 2aad.

T) Adeegga Biyaha Nadiifka

Dhulka miyiga adeegyada biyaha nadiifka ee laga fulinayo waxay isugu jiraan 2,133 ceelasha dhaadheer, 14,908 oo ah ceelasha aan sidaa u dheereyn, 101,355 ceel oo ah kuwa gacanta lagu qodo, 404 balliyo (waro), 556 goobood oo biyaha lagu keydiyo (sida barkadaha), diyaarinta 14 goobood oo biyaha lagu uruuriyo iyo 11,065 oo ilaha biyaha ah oo la horumariyo. Waxaa intaasi dheer 48,510 xarumood oo bixiya adeegga biyaha nadiifka ah dib u habeyn ayaa lagu sameynayaa.Qorshahan horumarinta biyahana waxaa ka mid ah Darsidda iyo Naqshadeynta adeegyada biyaha magaalooyinka oo ay ka faa'ideysan karaan dadka dan yarta ama saboolka ah oo magaalooyinka ku dhaqan laguna horumarin karo dhaqaalaha shaqsiyaadka, 514 magaalo oo loo dhisayo adeegyada biyaha nadiifka ah, 228 magaalo oo dib uhabeyn lagu sameynayo adeegga biyaha nadiifka ee ay hadda helaan.

J) Adeegga Korontada (Laydh tariigga)

Shanta sano uu qorshahan socda waxaa qorsheysan in dalka laga dhiso shan xarumood oo korontada laga dhaliyo oo cusub si awoodda koronta dhalinta dalka uu u gaaro 668 meegaa waat si adeegga iyo baaxadda korontada dalka loo saddex jibbaaro. Adeegga korontada ee dhulka miyiga ah oo sanadka 1997 ahaa 16% gabagabada qorshahan waxaa lagu wadaa oo qorsheysan sidi loo gaarsiin lahaa 50%.

X) Isgaarsiinta Taleefoonnada (Telecommunication)

Adeegga isgaarsiinta dalka sidi looga qayb gelin lahaa maalgeliyayaasha sida wada jirka ah uga shaqeyn kara sidii loo soo jiidan lahaa dadaal adag ayaa loogu jiraa. Adeegga isgaarsiinta dalka sanadkii 1997 heerka uu marayey marka la eego 2002 waxaa la rabaa in yoolkan la tiigsado. Macamiisha Taleefoonnada leynka oo ahaa 620,000 in la gaarsiiyo 3.23 milyon in ka badan, Tilifoonnada gacanta (moobaaylka) oo ahaa 410,000 in la gaarsiiyo 6.76 milyan in kabadan, adeegga interneetka oo ahaa 17,000 in la gaarsiiyo 193,000.

2.3.6. <u>In la sii wado sii xoojinta horumarinta xoogga shaqaale</u>

Dowladda si ay u sii xoojiso horumarinta xoogga shaqaale waxay 5ta sano ay dadaal adag u galeysaa ballaadhinta iyo tayeynta waxbarashada. Waxaa dadaal adag loo galayaa sidii xal looga raadin lahaa waxyaabaha carruurta ka hor istaaga inay fursado waxbarasho helaan gaar ahaanna gabdhaha.Adeegga caafimaadka guud ee dalka si loo gaarsiiyo dhammaan shacabka ku nool miyiga inta uu qorshahan socda xarumihii caafimaadka ee jiray iyo kuwa hadda la dhisasyaba waxaa lagu xoojinaya qalab, shaqaale iyo maaliyad intaba.

2.3.7. Ballaadhinta fursadaha shaqada

Dowladda waxaa sugaya laba arrimood oo la xidhiidha ballaadhinta fursadaha shaqada:

- In la xakameeyo korodhka tirada shacabka iyo
- In la ballaadhiyo howlaha wax soo saarka wanaagsan leh ee isticmaala xoog shaqaale oo badan.

Sidaa darteed, inta uu qorshahani socdo waxaa fiira gaar ah la siinayaa Horumarinta miyiga, warshadaha, ganacsiga dibadda, dhismayaasha iyo howlaha kale ee u baahan xoogga shaqaale ee badan. Waxaa sida oo kale ahmiyad gaar ah la siinayaa horumarinta ganacsiga dhexe iyo kuwa yar yar.

2.3.8. Joojinta amaba xakameynta cabsida iyo xasilooni darrada ka iman karto ku waxyoolloobidda masiibooyinka

Ku waxyeelloobidda masiibooyinka waxaa lagu xakameyn karaa 3dan heer ee hoos ku xusan:

- Heerka hantida aadaminimo, wax soo saarka beeraha oo yaraado iyo dhibaatooyinka cunna la'aanta ee qoyska la soo darso oo ay sababaan cudurrada kala geddisan oo la yareeyo;
- In la yareeyo culeys miisaaniyadda dolwadda soo food saaro oo ay sababaan dhaqaalaha oo si xun loo maareeyo, taageerada horumarka oo hoos u dhaco, sicirka (qiimaha) shidaalka oo sare u kaco, dakhliga qaranka soo galo oo yaraado iyo sababa kale oo badan;
- Guud ahaan heerka dhaqaalaha qaranka si uu korodhkiisa uu u noqdo mid halkiisa ka sii sicda oo uu dhimista saboolnimadana gacan uu uga geysto waa in la yareeyo marxaladda waxsoo saarka dalka gudahiisa ee iska daba wareegga ku saleysan.

Tillaabooyinkaasi kor ku xusan si ay xal u noqdaan waa in qoys ahaan waxsoo saarkooda beeraha ee halka nooc ku saleysan iyo habka aadka u dib dhacsan ee ay u soo saarnba ay wax ka baddalaan oo ay ballaadhiyaan noocyada beeraha iyo wax soo saarkoodaba oo ay abuuraan dakhliyo ka baxsan beeraha (Diversification), ganacsiga dibadda ee ku saleysan wax soo saarka

dalka gudahiisa oo aadka u kooban oo lagu baddalo wax soo saar noocya badan leh, ballaadhinta waraabka waxay arrimahaasi oo dhan oo is biirsaday ay dalka ku keeni kartaa taageero dibadda uu dalka ka helo oo joogta ah oo heer qaran waxtar weyn u leh.

3. Qaabdhismeedka guud ee dhaqaalaha qorshahaan iyo aragtida horumarka/koboca

3.1. Horumarka guud ee dhaqaalaha

Qorshaha horumarka ee shanta sano oo kan ka horreysay celcelis ahaan waxaa dalka u soo hoyday kobac dhaqaale oo dhan sanadkiba 6.4%. Qorshanna waxaa la rabaa in kobacaasi dhaqaale sanadkiba la gaarsiiyo 7%.Ujeeddooyinka aan fogeyn amaba dhexe ee qorshahaan waxaa weeye in la abuuro jawi maalgaliyaasha ku habboon iyo barnaamijyo maal geliyayaasha soo jiidan kara si wax soo saarka sare loogu qaado oo kobac dhaqaalana loo gaaro. Yoolka ugu muhiimsan uu qorshan tiigsanayo waxaa weeye in wax soo saarka dalka gudahiisa ah sare loo qaado, in la abuuro xaalad dhaqaale oo xasiloon, lacagta oo si ballaadhan loo isticmaalo si aan keeneyn qiima jab (dhac) iyo in la helo nidaam lagu go'aamin karo sarrifka lacagta adag.

Muddada uu qorshahaan socdo waxaa sare loo qaadayaa beera gashiga (agricultural input). Waxaana la filaayaa wax soo saarka beeraha sanadkiba inuu sare u kici doono 6.2%. Waxayna arrintani dhaboobi kartaa oo keliya haddii la helo qorshe-hawleedyo lagu ballaadhinayo ganacsiga dibadda oo si buuxdana loo howlgeliyo oo la balladhiyo adeegga deyn (amaah) bixinta.

Maalgelinta guud ee dalka gudihiisa waxuu gaadhayaa 24%. Wax soo saarka intiisa badan maadaama uu noqonayo mid loo adeegsado keyd iyo maalgelin isticmaalka wax soo saarkaasi wuxuu sare u kacayaa si ka hooseysa awoodda wax soo saar. Keydka oo wax soo saarka guud ku lahaa 3.7% waxaa la filayaa inuu gaari doono gabagabada qorshahani 13.1%. Ganacsiga dibaddana waxaa la filayaa wax soo saarka guud 20% inuu ka qaadanayo ganacsiga dibadda laga soo dejiyo waxaa la filayaa inuu hoos u dhici doono 31%.

3.2. Dakhliga iyo Kharashka Dowladda

Gabagabada qorshahani dakhliga laga helayo cashuurta oo sanadkii 1997 ahaa 12.5% waxaa la filayaa inuu gaari doono 17%. Kharashka dowladda oo wax soo saarka guud ee dalka gudahiisa ku lahaa 11.5% waxaa lagu wadaa in la gaarsiiyo 16% si loo kordhiyo kharashyada ku baxa (ku wajahan dhimista saboolnimada).

3.3. Ganacsiga dibadda iyo Maal gelinta dibadda ee tooska ah

Si loo yareeyo ganacsiga dibadda ee bunka uun ku tiirsan waxaa dadaal adag loo galayaa sidi loo balaadhin lahaa noocyada dibadda loo dhooofiyo. Bunka inkasta oo uu wakhti kooban laga yaabo inuu hormuud ka noqdo ganacsiga dibadda haddana ganacsiga dibadda si looga faa'ideysto waa inaan ganacsiga dibadda u sii ballaadhinna khudradda, ubaxa, hilibka, hargaha iyo dharka. Waxaa wax laga baddalayaa sharciga maal gelinta u yaalla si uu sharcigu u noqdo mid ku habboon ama ku wanaagsan ganacsiga dibadaha loo dhoofiyo.

3.4. Dhaqaalaha Maaliyadda

Bangiyada waxaa lagu dhiirra gelinayaa inay nidaamkooda shaqo ay ku saleeyaan hab casri ah oo ay awooddooda wax qabad sare u qaadaan. Waxaana halkoodii ka sii soconaya howlaha bangiyada gaarka loo leeyahay lagu taageerayo maaliyadda. Gabagabada qorshahanna waxaa la filayaa bangiyada gaarka loo leeyahay lacagaha la dhigo iyo amaahda ay bixiyaanba inuu 33% uu sare u kaco.Waxaa sida oo kale la sii xoojinayaa awoodda dabagalka ee bangiga dhexe. Waxaa dadaal adag loo galayaa xarumaha bixiya lacagaha amaahda iyo keydka ee yaryar in la ballaadhiyo meelaha ay ka howl galaan gaar ahaanna dhulka miyiga in la gaarsiiyo.

3.5. Qorshaha Lacagta

Ujeeddada ugu weyn Qorshayaasha lacagta dalka waxaa weeye xasilinta iyo go'aaminta qiimaha lacagta adag muddada uu qorshahan hirgalayana waxaa dadaal loo galayaa sicir bararka guud ee sanadka celcelis ahaan inuusan 8% ka badanin.

3.6. Nidaamka Hoos u Dhaadhacinta Maamulka

Ujeeddada qorshe hawleedka miisaaniyadda ee wakhtiga dhexe waxaa weeye sidii iyada oo aaney dhicin miisaaniyad yari xad dhaaf ah (budget deficit) in haddana miisaaniyada loo kordhiyo sida arrimaha muhiimka ee beeraha, dammaanadda qaadka cunnada iyo waxbarshada ee ka midka ah furaha u ah horumarka. Waxaana lagu dadaalaya miisaniyad yarida inaysan kor u dhaafin 6.5% waxsoo saarka guud ee dalka. Waxaa la filayaa in kobaca wax soo saarka warshadaha, alaabada dibadda loo dhoofiyo, beeraha iyo nidaamka dakhli uruurinta ee wax laga baddalayi in ay sare uu qaadaan dakhliga dawladda.

Miisaaniyadaha dowlad deegaannada lagu kabo waxay noqon doontaa mid wakhti kasta dib loo saxo iyada oo lagu saleynayo kharshka ay u baahan yihiin ee ku baxa iyo awoodooda

isticmaalidda miisaaniyadda. Miisaaniyadaha degmooyinka loo qoondeeyana iyada oo aysan cidna fara galinayn waxay u isticmaalayaan hadba kolba sida baahida haysata ay u kala horeyso. Gabagabada qorshe hawleedkana waxaa la filayaa in deegaan kasta uu yeelan doono miisaaniyad uqondeysan degmooyinka oo qorsheeysan. Degmooyinkuna dakhliyada ay soo xareeyaan inta ugu badan waxay u isticmaalayaan manafacaadkooda. Qoondeyntu miisaaniyadduna waxaa la raacinayaa dhiirra gelin dhinaca dakhli uruurinta ah oo degmooyinka dhexdooda laga dhex abuurayo. Waxaana la xoojinayaa nidaamyada xisaabinta, baaridda, dabagalka, iyo hawlaha hanti dhowrka.

4. Qorshaha Dhaqaalaha iyo Arimaha Bulshada

4.1. Horumarinta Beeraha iyo Miyiga Horumarinta Beeraha iyo Miyiga (aasaaska ugu muhiimsan ee istiraaatiijiyadda horumarinta waxsoosaarka beeraha ee Itoobiya)

Xaqiijinta inuu jiro nidaam ku habboon ka faa'ideysiga iyo bixinta dhulka, diyaarinta isla-markaana hirgelinta qorshe ku saabsan isticmaalidda dhulka iyo in la diyaariyo nidaam ku habboon wax soo saarka beeraha dalka oo ku saleysan beeyada gobollada dalka iyo nidaam qeybiineed oo hahoon iyo hab dhaqan wax lagu kala iibsan karo wax soo saarka. Dowladda waxay taageerada ku habboon ay u fidinaysaa beeraleyeda iyo xoola-dhaqatada sidi ay u qaban lahaayeen howla ay ka faa'ideysan karaan.Waqtigan xaadirkanna waxaa dalka oo dhan loo qaybiyey 6 gobalood oo ku saleysan kala duwanaashaha dhinaca beeyada beeraha. Qaybahaasi dalka loo qaybiyeyna waxay kala yihiin:

1) Agagaaraha Taanaa Balas ee deegaanka Amxaarada
2) Bariga iyo Galbeedka Hararge oo xaruun ay u tahay Diridhabe
3) Dhulka Doxooyiinka
4) Koonfurta iyo Koonfurta Galbeed
5) Agagaaraha Magaalada Addis Ababa
6) Goobaha Dib u dejinta laga sameeyay, kuwaasii oo loogu dadaali doono sidi suqyada caalamka loogu dhoofin laha waxsoosaarkoo da.

4.2 Waxbarasho

Barnaamijka horumarinta waxbarashada ee wareega saddexaad (ESDP III) (1998-2002 tirsiga Itoobiya) Ujeeddada guud ee horumarinta waxbarshadana waxaa weeye in tira ahaan iyo taya ahaanba la soo saaro shaqaale tababaran oo karti leh oo hirgelin kara qorshooyinka horumarka ee

lagu hirgelin karo yoolka horumarka qarniga (MDGs) iyo yoolka qorshaha horumarka ee qaranka. (yoolka horumarinta waxbarashada dugsiyada hoose ka eeg lifaaqa saddexaad)**.**

4.3. Caafimaad

Qorshaha caafimaadka wuxuu diirada saaraya cudurrada xidhiidhka la lah saboolnimada ee la kala qaado sida HIV/AIDSka, Qaaxada (TB), Duumada (kaneecada), shubanka iyo cudurrada hooyooyinka iyo carruurta ku dhaca.Qorshuhuna wuxuu xoogga saarayaa deegaannada miyiga iyada oo adeegyada caafimaadka shacabka qaybihiisa kala duwan ilaa heer qoys la gaarsiinayo. Si gaar ahna heerarka kala duwan ee adeegyada caafimaadka la fulinayo waxaa la wafajinaya sinaanshaha dhediga iyo labka. (faahfaahin dheeri ah haddii aad u baahato eeg lifaaqa afaraad).

4.4. Dalxiiska

Dalxiiska inkasta oo uu ka mid yahay ilaha dhaqaale ee aanu dalku sida wanaagsan uga faa'ideysanin haddana dalxiisku wuxuu ka mid yahay waxyaabaha qorshahan horumarinta ahmiyadda koowaad lagu siinayo. Dowladda qorshaheeda fog waxaa weeye siddii Itoobiya sanadka 2012 ay uga mid noqoto 10ka dal ee qaaraddaan Afrika ee ay dalxiisayaasha ugu badan u soo dalxiis tagaan (yimaadaan) taasoo la doonayo si weyn sidii gacan uga geysan lahayd dhaqdhaqaaqyada lagu dhimayo saboolnimada.

4.5. Horumarinta Kheyraadka Macdanta

Istiraatiijiyadda iyo Ujeeddooyinka horumarinta macdanta dalka waxaa ka mid ah in sare loo qaado qariidadda dalka ee muujinaysa macdainta dalka ku jirta, in la abuuro marxalad horumarinta macdanta ku habboon, in daraasado lagu sameeyo biyaha. Dhulka hoostiisa eek u saleysan cilmiga jioloojiga iyo jiofiisikaalka, diyaarinta dukumantiyo sare u qaadi karo farsamada macdanta la xidhiidha, taageera farsamo in la diyaariyo, tababarro oo la bixiyo iyo in la dhiso xaruumaha la talinta ee la xidhiidha horumarinta macdanta.

4.6. Horumarinta Arrimaha Buulshada

Korodhka tirada shacabka (oo sanadkiba 2 malyuu ku koradha) maadaamaa uu culeys weyn ay saareyso hantida (khayraadka) uu dalku leeyahay waxay taasii ay caqabad ku tahay qorshaha dhimista saboolnimada.Korodhka tirada shacabka oo la yareeyana waxay saameeyn wax ku ool ah ku yeelaneysa daryeelka caafimaadka haweenka iyo carruurta. Korodha tirada shacabka waxa sababa tirada dhalmada oo badata iyo dhimashada oo yaraata. Waqtigan xaadirka celcelis ahaan haweeney kasta waxay dhaleysa carruur dhan 5.4. Korodhkana wuxuu noqonayaa 2.73%. Hase

yeeshee, dadku maadaamaa ay u baahan yihiin tirada yar ee qoyskooda waxaa isasoo tareysa isticmaalka hab xakameynta taranka qoyska. Gaar ahaanna Magaaladan Addis Ababa waxaa soo yaraanaeysa tirada carruurta ee qoyskiba ka dhasha. Qorshe hawleeka la xidhiidha tirada buulshada wuxuu dhigayaa in 2025 tirsiga reer yurub taranka dhalmada ee ah 5.4% la gaarsiiyo 4%, in hab xakameynta taranka isticmaaliddeduna la gaarsiiyo 44% si loo yareeyo dhimashada hooyooyinka iyo carruurta.

4.7. Horumarka Aasaasiga

4.7.1. Adeegga Biyaha Iyo Daryeelka Nadaafadda

Ujeeddada qorshahaan waxaa weeye sanadka 2002 tirsiga Itoobiya in adeegga biyaha nadiifta ah ee la cabbo loo horumarin laha sidaan soo socota. Masaafada 1.5 km ee ay dadku biyaha u raadsadaan ee 44% mareysa in la gaarsiiyo 80%, adeegga biyaha nadiifta ah ee ay shacabka magaalooyinku ku helaan ee 80.6% mareysa in la gaarsiiyo 92.5. Waxaa intaa dheer in heerka isticmaalidda waraabka ee haatan 5% mareysa gabagabada qorshahaan in la gaasrsiiyo 8%.

Arrimaha ku saabsan suuliyada (musqulaha) gabagabada qorshahani iyada oo la sii ballaadhinayo fursada isticmaalka musqulaha ee reer miyiga oo ah 17.5% in la gaarsiiyo 79.8, heerka fursadeed ee magaalooyinka aa haatan mareysa 50% waxaa lagu tala jiraa sidi loo gaarsiin lahaa 89.4%.(faahfaahin dheeri ah haddii aad u baahato eeg lifaaqa shanaad).

4.7.2. Adeegyada korontada iyo Isgaarsiinta

Awoodda soo saaridda (dhalinta) korontada ee hay'adda quwadda korontada Itoobiya oo haatan mareysa 791 meega waat waxaa la gaarsiinyaa 2,218 meegaa waat sanadka 2002 oo saddex jibbaar sare loo qaaday (yoolka isgaarsiinta oo faahfaahsan ka eeg lifaaqa lixaad).

4.7.3. Horumarinta Warshadaha

Inta uu qorshani socda horumarka warshadaha dalka celcelis ahaan sanadkiba waxaa kor loo qaadayaa 11.5, wax soo saarka guud ee dalka gudahiisa oo 13.6 ku leh warshadahaasi gabagada qorshahan waxaa la gaarsiinayaa 16.5%.

5. Kobcinta awoodda fulinta

Itoobiya waqtigan xaadirkan waxaa ka go'an inay si buuxda u hirgeliso maamul ku saleysan dimuqraadiyadda, xuquuqda aadanaha iyo xuquuqaha dastuurka dalka ku qeexan. Sidaa awgeed,

si qorshahan horumarka si buuxda loo hirgeliyo waxay dolwaddu diyaarisay Istiraatiijiyado kala duwan iyo barnaamijyo badan oo dib u habeyn ah.

5.1. Kobcinta Awoodda Degmooyinka Miyiga

Muddada uu qorshahan hirgalayo heer degmo si looga hir geliyo loona xoojiyo hoos u daadajinta maamulka arrimaha ahmiyadda koowaad lagu siiyey qorshahan waa kuwan hoos ku xusan:

- Baahida xoogga shaqaale ee degmooyinka oo la ogaado, loo shaqaaleeyo, awooddoodana la kobciyo.
- In la abuuro hay'adaha maamulka heer degmo oo qaab dhismeed wanaagsan leh.
- In la buuro nidaam wanaagsan oo shacabka si buuxda uga qayb qaadan karo.
- In la xoojiyo awoodda ay degmooyinka miisaaniyadda ku diyaarsadaan, miisaaniyaddooda u isticmaalaan kuna daba galaan iyo diyaarinta iyo fulinta qorshooyinka heer dgmo.
- In la diyaariyo nidaam cadcaddaan leh oo xil la isaga saarayo tilmaamayaasha bixinta adeegyada iyo nidaamki lagu qiimeyn lahaa intaba.
- Kobcinta awoodda fulinta qabaleeyada oo dhinac kasta ah.

6. Horumarinta iyo Ilaalinta Deegaanka

Yoolka ugu muhiimsan ilaalinta deegaanka oo qorshahan ahmiyadda koowaad lagu siiyay waa kuwan hoos ku xusan:

b) Wax ka baddalidda deegaannada miyiga si loo helo nolol waarta oo wanaagsan.

t) Si loo yareeyo wasakheynta hawada in wax laga baddalo nidaamka wasakhda loo maareeya.

j) In la taabba galiyo Horumar dhaqaale iyo Mid bulsho oo waara.

7. Siyaabaha Lagu Dabagalayo Laguna Qiimeynayo Qorshahan Horumarka

Siyaabaha ama nidaamka lagu qiimeynayo laguna dabagalayo qorshahan horumarka waxaa ka mid ah qodobbadaan hoos ku xusan.

- In la sameeyo daraasado dulmar ah
- In la diyaariyo astaano tilmaami kara geedi socodka natiijooyinka iyo waxyaabaha qorshahan fulintiisa loo adeegsaday.
- In la hirgeliyo habab cusub oo laga qayb gali karo oo la mid ah kormeerka saboolnimada.
- In la adeegsado macluumaadka joogtada ah ee ay soo uruuriyaan wasaaradaha iyo heerarka kala duwan dowlad deegannada.

Ilahaan loo adegsan karo qiimeynta iyo dabagalka kor ku xusan waxaa dheer oo la adeegsan karaa macluumaadka ay bulshada rayadka ah soo uruuriyaan tusaale ahaan sida macluumaadka daraasadeysan ee ay hay'adda PANE soo uruurisay iwm oo la isticmaalana waxtar aad u weyn ayay leedahay.

Lifaaqa 1aad**: <u>Bartilmaameedyada ugu muhiimsan qorshaha horumarka 5ta sano</u>**

Bartilmaameedka ama Tilmaame	**Gabagabadi 1997 waxa la gaaray**	**Yoolka qorshahan 5ta Sano (gabagabada 2002 waxaa la gaadhayaa)**
Dhaqaalaha Guud		
Kobaca waxsoosaarka dalka gudahiisa (GDP) Wax soo saarka guud ee dalka gudahiisa	10.6	Ugu yaraan 7% (kobaca dhaqaale ee sanadkiba)
Maalgelinta guud ee dalka gudahiisa qaybta uu ku lahaanayo wax soo saarka dalka gudahiisa(boqolkiba)	20.5	26.1
Keydka guud ee dalka gudahiisa qaybta uu ku lahaanayo wax soo saarka dalka gudahiisa(boqolkiba)	3.7	13.1
Ganacsiga guud ee dibadda qaybta uu ku lahaanayo wax soo saarka dalka gudahiisa hadba qiimaha markaasi taagan (boqolkiba)	15.8	19.7
Gannacsiga guud ee dibadda laga soo dejiyo qaybta uu ku lahaanayo wax soo saarka dalka gudahiisa hadba qiimaha markaasi taagan (boqolkiba)	34.3	31.7
Dakhliga dalka gudahiisa qaybta uu ku lahaanayo wax soo saarka dalka gudahiisa hadba qiimaha markaasi taagan (boqolkiba)	15.8	18.7
Dakhliga canshuurta qaybta uu ku lahaanayo wax soo saarka dalka gudahiisa hadba qiimaha markaasi taagan (boqolkiba)	12.5	17
Kharashka guud ee dowladda ku baxo qaybta uu ku lahaanayo wax soo saarka dalka gudahiisa hadba qiimaha markaasi taagan (boqolkiba)	25.2	27.0
Kharashka guud ee ku wajahan saboolnimada qaybta uu ku lahaanayo wax soo saarka dalka gudahiisa hadba qiimaha markaasi taagan (boqolkiba)	14.2	22.5
Kharashka Raasuumaalka qaybta uu ku lahaanayo wax soo saarka dalka gudahiisa hadba qiimaha markaasi taagan (boqolkiba)	11.8	15.8
Xaaladda Badbaadada Noolasha		
Tirada shacabka ku nool khadka saboolnimada ka hooseeya (boqolkiiba)	39	29
Tirada shacabka ku nool saboolnimada dhinaca cunnada (boqolkiiba)	38	28
Beeraha		
Korodhka guud ee beera gashiga (boqolkiiba)	13.4	6.2 (celcelis ahaan sanadkiba)
Beeraha iyo waxyaabaha la xidhiidha qaybta uu ku lahaanayo wax soo saarka dalka gudahiisa (GDP)	46.2	43.9

hadba qiimaha markaasi taagan (boqolkiba)		

Bartilmaameedka ama Tilmaame	Gabagabadi 1997 waxa la gaaray	Yoolka qorshahan 5ta Sano (gabagabada 2002 waxaa la gaadhayaa)
Wax soo sarka dalagga ee ugu muhiimsan (malyan tan)	16.7	38.2
Wax soo saarka hilibka (1000 meetriik tan)	566	837
Ganacsiga hilibka ee dibadda loo dhoofiyo (1000 meetriik tan)	8	62
Warshadaha		
Korodhka guud ee cashuurta dheeriga ee warshadaha (boqolkiiba)	8.1	11.5(celcelis ahaan sanadkiba)
Warshaduhu qaybta ay ku leeyihiin wax soo saarka guud ee dalka gudahiisa (boqolkiba)	13.4	16.5
Waxbarashada		
Waxbarashada dugsiga hoose (1-8) (GER)	79	100
Heerka dhameystirka waxbarashada dugsiyada hoose (boqolkiiba)	34	63
Heerka Isku dhafnaanshara ee tirade ardayda gabdhaha iyo wiilasha wax ka barta dugsiyada hoose	0.84	0.97
Ardayda iyo buugaagta waxbarashada sida ay isu waafaqsan yihiin	2:1	1:1
Ardayda iyo fasallada ay ku bartaan sida ay isugu filan yihiin	1:69	1:50
Heerka joojinta waxbarashada fasalka koowaad	22.4	6.3
Caafimaadka		
Baaxadda Adeegga Caafimaadka (boqolkiiba)	70	100
Baaxadda tallaalka DPT (boqolkiiba)	61	80
Dhimashada Carruurta	77/1,000	45/1,000
Dhimashada Hooyooyinka	871/100,000	600/100,000
Tirada dadka isticmaala dawooyinka dhalmada lagaga hortago (boqolkiiba) ama xakameynta taranka	15	80
Tirada dakda ku aafoobay cudurka HIV/AIDS (boqolkiiba)	0.56	0.52
Tirada hooyooyinka ku dhala daryeel hahoon oo ay ka helaan xirfadlayaal caafimaad oo tababaran (boqolkiiba)	9	32
Biyaha		
Adeegga biyaha nadiifta (miyiga) ee laga helo masaafo dhan 1.5km	35	80
Adeegga biyaha nadiifka (magaalo) ee laga helo masaafo dhan 0.5km	80	92.52
Waddooyinka		
Waddooyinka (km/1000 km)	33.2	54.1
Waddooyinka heerkooda uu wanaagsan yahay (boqolkiiba)	64	84
Wakhtiga ay ku qaadaneyso in la tago waddo cimilo kasta lagu socon karo (saacad ahaan)	5	3.2

Korontada (laydh-tariigga)		
Adeegga korontada (boqolkiiba)	16	50
Magaalooyinka hela adeegga korontada (tira ahaan)	648	6000
Bartilmaameedka ama Tilmaame	**Gabagabadi 1997 waxa la gaaray**	**Yoolka qorshahan 5ta Sano (gabagabada 2002 waxaa la gaadhayaa)**
Isgaarsiinta (telecommunication)		
Adeegga Isgaarsiinta (5ti km ba) (boqolkiiba)	6	100
Qabaleeyada helo adeegga taleefoonnada (tira ahaan)	3,000	15,000
Dadka isticmaalo taleefoonnada gacanta (mobaaylka) (boqolkiba)	0.56	8.1
Dadka isticmaalo talefoonnada leynka (boqolkiiba)	0.85	3.87
Dadka adeegga isgaarsiinta agagaarahooda ka helo(boqolkiiba) (qiyaasti 5km)	6	160
Dadka isticmaalo taleefoonnada leynka (malyankiba)	0.62	3.23
Dadka isticmaalo taleefoonnada gacanta (mobaaylka) (malyankiba)	0.411	6.761
Tirada dadka isticmaalo adeegga interneetka (tira ahaan)	17,375	193,100
Macdanta		
Sare u qaadidda baaxadda qariidadda jioloojiga (boqolkiba)	38	53
Sare u qaadidda baaxadda qariidadda haydirooloojiga (boqolkiiba)	27	42
Sare u qaadidda baaxadda Injineeriyadda Jioloojiga (boqolkiiba)	7	15
Sare u qaadidda baaxadda Jiioofiisiksiga (boqolkiiba)	65	80
Horumarinta Magaalooyinka		
Dhimidda camal la'aanta (magaalooyinka ay ku nool yihiin dad ka badan 50,000 oo qof) (boqolkiiba)	40	20
Fidinta Adeegyada aasaasiga iyo hoyga (boqolkiiba)	30	65
Dhisidda guriyaha hoyga oo cusub tira ahaan	-	100,000 (celcelis ahaan sanadkiba)
Fidinta adeegyada iyo horumarka aasaasiga ee dhulka	-	3,800 oo heektaar
Deegaannada waxyeelloobay amaba tirada dadka la ciirayo oo laga fududeeyo cusleyskaasi (boqolkiiba)	70	35
Kobcinta shirkadaha ganacsiga ee yaryar (tira ahaan)	-	12,000 (celcelis ahaan sanadkiba)
Ganacsiga Dibadda		
Dakhliga wax soo saarka beeraha ee dibadda loo dhoofiyo (malyan doolar oo mareykan ah)	546	1515
Dakhliga wax soo saarka warshadaha ee dibadda loo dhoofiyo (malyan birr)	63.73 (saamaha iyo harkaha)	500
Sare u qaadidda dakhliga laga helo macdanta	20	44.7

Lifaaqa 2aad: **Qorshaha iyo bartilmaameedka horumarinta waddooyinka ee shanta sano**

Ujeeddooyinka	Tilmaamayaasha	1997 waxaa la gaadhay	Sanadka 1aad 1998	Sanadka 2aad 1999	Sanadka 3aad 2000	Sanadka 4aad 2001	Sanadka 5aad 2002	Ilaha lagu xaqiijinayo
1. Helitaanka waddooyinka (Increased accessibility)	Hoos u dhigidda saacadaha ay qaadanayaan gaadhidda waddooyinka roob iyo roob la'aanba la adeegsan karo (saacad ahaan)	5	4.9	4.5	4.1	3.6	3.2	Warbixinnada horumarinta waddooyinka
	Hoos u dhigidda deegaannada 5 saac ka badan waddooyinka roob iyo roob la'aanba la mari karo loo socda (boqolkiiba)	72	71	69	67	63	59	Warbixinnada horumarinta waddooyinka
	Hoos u dhigidda deegaannada 2 saac ka badan waddooyinka roob iyo roob la'aanba la mari karo loo socda (boqolkiiba)	88	87	86	85	83	81	Warbixinnada horumarinta waddooyinka
2. Kor u soo qaadidda isku dhawaanshaha waddooyinka	Isku dhawaanshaha waddooyinka marka lagu daro kuwa ay shacabku dhiseen (km/1000 kaare km)	33.6	34.9	37.8	41.7	47.5	54.1	Warbixinnada horumarinta waddooyinka
	Isku dhawaanshaha waddooyinka marka lagu daro kuwa ay shacabku dhiseen (km/1000 qofba)	0.51	0.51	0.54	0.59	0.65	0.72	Warbixinnada horumarinta waddooyinka

3. Xaaladda waddooyinka ay ku sugan yihiin	Waddada uu xaaladda ay ku sugan tahay uu wanaagsan yahay qaybta uu ku leeyahay	64	66	71	75	80	84	Warbixinnada horumarinta waddooyinka
	Miisaaniyadda guud ee horumarinta waddooyinka loo qoondeeyey qaybta uu dayactirku uu ku yeelanayo	22	24	26	28	30	32	Warbixinnada horumarinta waddooyinka
3. Waddooyinka cusub ee la dhisayo	Waddooyinka cusub ee ay dhisayaan federaalka iyo dowlad deegaannada uu awooddooda hooseeyo ee dheerarkooda (km)	552	1367	3160	4362	6354	7214	Warbixinnada mashaariicda
4. Kor u qaadidda ka qayb qaadashada horumarinta ee qandaraaslayaasha shaqsiga	Qaybta ay qeybaha madaxabanaan ku leeyihiin dhismaha iyo dayactirka waddooyinka(%)	60	75	80	85	85	85	Warbixinta fulinta
6.Kor u qaadidda socodka baabuurta iyo isdhaafsiga ganacsiga	Celcelis ahaan dheerarka waddooyinka ay gawaaridu jaraan (malyan km)	5.604	5.884	6.178	6.487	6.811	7.151	Warbixinnada daraasaadka socodka baabuurta

Lifaaqa 3aad: **Yoolka Horumarinta Waxbarashada Dugsiyada Hoose.**

Bartilmaameedka	Tilmaamayaasha	1997	1998	1999	2000	2001	2002
Kor u qaadidda ka qayb galka waxbarashada dugsiga hoose	Ka qayb galka * Waxbarashada dugsiyada hoose heerka koowaad (1-4) (Net Enrollment Rate)	67.6	70.6	74.6	78.6	82.6	86.6
	Lab	65.1	68.3	72.3	76.3	80.3	84.3
	Dhaddig	69.9	72.9	76.9	80.9	84.9	88.9
	Ka qayb galka * Waxbarashada dugsiyada hoose heerka labaad (5-8) (Net Enrollment Rate)	33.9	39.9	45.8	51.8	57.8	63.8
	Lab	29.4	35.3	41.3	47.3	53.3	59.3
	Dhaddig	38.3	44.0	50.0	56.0	62.0	68.0
Yareynta ama dhimidda joojinta waxbarashada	Joojinta waxbarashada dugsiga hoose	22.4	19.1	15.9	12.7	9.5	6.3
Kor u qaadidda dhameystirida waxbarashada dugsiyada hoose	Joojinta waxbarashada fasalka 5aad	57.4	78.4	77.8	88.7	121.1	136.6
	Joojinta waxbarashada fasalka 8aad	34.0	39.0	42.0	45.0	58.0	63.0
Dhimidda tirada macallinka iyo ardayda isku soo aada (pupil/teacher ratio)	Waxbarshada dugsiga hoose heerka labaad (5-8)	71	69	65	61	58	63
	Dugsiga sare (9-12)	55	55	52	50	47	45
		78	70	63	55	48	40
Wax ka baddalidda helitaanka buugaagta waxbarashada ee maaddooyinka kala duduwan	Buugaagta waxbarashada iyo ardayda sida ay isugu soo aadaan (Pupil/Textbook Ratio	2:1	1.5:1	1:1	1:1	1:1	1:1

* Ka qayb galka waxbarashada dugsiga hoose fasalka 1-4 waxaa weeye carruurta ay da'dooda waxbarashada gaadhay ee ay da'dooda u dhaxayso (7-14) ardayda ka tirsan ee waxbarashadooda wato qaybta ay ku leeyihiin weeye.

Lifaaqa 4aad: **Bartilmaameedka Horumarinta Adeegga Caafimaadka**

Tilmaamayaasha	**1997 adeeggaasi heerka uu marayay**	**2002 halka la rabo in la gaarsiiyo (yoolka la tiigsanayo)**
Dhimashada carruurta	97/1000 sanadka 1996	45/1000
Dhimashada carruurta ay da'dooda ka hooseyso 5 jirka	140/1000 sanadka 1996	85/1000
Dimashada hooyooyinka	871/100000 sanadka 1996	600/100000
Ku aafoobidda cudurka qaaxada inta ay gaarsiisan tahay	76%	85%
Baaxadda tallaalka DPT inta uu gaarsiisan yahay (boqolkiiba)	70	80
Tirada dadka isticmaalo dawooyinka dhalmada lagaga hortago	15%	60%
Tirada hooyooyinka ku umulo daryeel ay ka helaan xirfadlayaasha caafimaadka ee tababaran	9%	32%
Adeegga shaqsi ahaan u soo gaara bukaan socodka	0.3	0.6
Tirada qoysaska isticmaalo 2 mara kaneeco ee ku nool deegaannada kaneecada leh (boqolkiiba)	1	100
Xirafdlayaasha caafimaadka iyo Tirada shacabka sida ay isugu dhigmaan (dhakhtarka/shacabka)	1:26,527	1:2,500
Shaqaalaha fidinta adeega caafimaadka iyo tirada shacabka sida ay isugu dhigmaan	1:25,000	1:2,500

Lifaaqa 5aad: **Bartilmaameedka iyo Qorshaha Horumarinta kheyraadka biyaha.**

Tilmaamayaasha	1998	1999	2000	2001	2002
Adeegga biyaha nadiifka ah (shacabka guud ahaaneed boqolkiiba)	51.5	60.4	68.8	76.8	84.5
Shacabka dhulka miyiga ah ku nool oo biyaha nadiifka ah ka helo (masaafa aan ka badneyn 1.5km) (boqolkiiba)	44	53	62	71	80
Shacabka magaalada ku nool oo biyaha nadiifka ah ka helo (masaafa aan ka badneyn 0.5km) (boqolkiiba)	80.6	83.5	86.1	89.2	92.5
Dhisidda waraabka dhexe iyo kuwa waaweyn (heektar ahaan)	72,550	116,432	63,088	43,965	23,645
Dayactir iyo hawl gelin lagu sameeyo (ilaha biyaha ee dhulka miyiga ah ku yaallo ee aan bixinin adeeggi looga tala galay)	30	25	20	15	10

Lifaaqa 6aad: **Bartilmaameedka iyo Qorshaha Horumarka Isgaadhsiinta doorbidashadaleh**

Tilmaamayaasha	Sanadka uu ka billaabmayo (1997)	Gabagabada 5ta sano halka la gaarayo (2002)
Tirada shacabka Adeegga Isgaarsiinta ka helo masaafa dhan 5 km (boqolkiiba)	13	100
Khadka taleefoonnada leynka shacabka lagu gaarsiiyo	0.85	3.87
Khadka taleefoonnada gacanta (moobaaylka) shacabka lagu gaarsiiyo	0.56	8.1
Tirada Macamiisha isticmaasho adeegga Intarneetka	17,375	193,100
Tirada qabaleeyada helo adeegga talefoonnada	3000	15,000

Xusuus

- Taleefoonnada leynka iyo gacanta (moobaaylka) waxay ku saleysan yihiin qiyaasta korodhka dhaqaalaha dalka (GDP)
- Goobaha helay adeegga taleefoonnada waxaa ka mid ah magaalooyinka degmooyinka, xaruumaha bixiyo adeegga tlekoomka iyo Qabaleeyada dhulka miyiga ah ku yaallo.
- Goob kasta oo adeeggaasi lagu bixinayana wuxuu awood u yeelanayaa inuu qaabilo macamiil dhan (5-30,000) qof.

Yoolka Horumarka Qarniga (Millennium Development Goals) MDGs.

Yoolka 1aad: Cirib tiridda saboolnimada xad-dhaafka ah iyo gaajada

Yoolka 2aad: Ku guuleysashada waxbarashada dugsiga hoose oo caalamka oo dhan la gaarsiiyo

Yoolka 3aad: Sinnaanta jinsiga iyo awood siinta haweenka oo la taageero.

Yoolka 4aad: Dhimidda (yareynta) dhimashada carruurta.

Yoolka 5aad: Kor u soo qaadidda caafimaadka hooyada.

Yoolka 6aad: La dagaallanka cudurka HIV/AIDSKA, duumada (malaariyada) iyo Cudurrada kale oo loo halgamo.

Yoolka 7aad: Xaqiijinta jiritaanka deegaan noolasha ku habboon.

Yoolka 8aad: Xoojinta Iskaashiga Horumarka ee heer caalami.

Millennium Development Goals

Goal 1: Eradicate extreme poverty and hunger

Goal 2: Achieve universal primary education

Goal 3: Promote gender equality and empower women

Goal 4: Reduce child mortality

Goal 5: Improve maternal health

Goal 6: Combat HIV/AIDS, malaria and other diseases

Goal 7: Ensure environmental sustainability

Goal 8: Develop a global partnership for development

Hay'adda aan Dowliga ahayn ee Poverty Network Ethiopia (PANE)

Hay'adaha bulshada rayadka ee isku bahaystay la dagaallanka saboolnimada (PANE) waa hay'ad xiriirineysa bulshada rayadka hay'adaha u shaqeeya ee dalkan Itoobiya oo si gaar ah ugu howlan arrimaha bulshada rayadka ah (CSOs) iyada oo ka duuleysa barnaamijyada amaba istiraatiijiyadaha dhimista saboolnimada iyada oo u diyaarisay (dejinta barnaamijyada, hirgelinta istiraatiijiyadahaasi, isla-markaana dabagal iyo qiimeyn ku sameynaysa). Hay'adda PANE waxay si weyn u daneysaa Qorshayaasha PRSPs iyo kuwa kale iyada oo daraasado iyo baaridba ku sameysa oo si cadna u taageerta (ugu olololeysa) oo wixi macluumaad ah oo ay heshana la qaybsanaysa hay'adaha kale ee hirgelinta Qorshahaasi daneeya.

Hay'adda PANE waxay mataleysaa bulshada rayadka oo aad u tira badan iyada oo ay hay'adda ay ka howl galeyso dalka oo dhan.

Himilada Hay'adda PANE

Hay'adda PANE waxay ku hammineysaa inay aragto Itoobiya oo si kama dambeys ah saboolnimada looga cidhib tiray oo shacabka Itoobiyana ay ku nool yihiin sharaf iyo xorriyad.

Howlgalka hay'adda PANE

Hay'adda iyada oo howlaheeda ku qaabileysa si waafqsan xuquuqda aadanaha, howlaha xiriirinta ee ay qaabaneyso waxaa weeye: Muwaaddiniinta oo awood la siiyo si ay hab firfircooni leh ay uga qayb qaataan dejinta barnaamijyada, hirgelintooda, dabagalka iyo qiimeynta barnaamijyadaasi intaba si loo maqlo codka dadka saboolka ah oo ay uga qayb qaataan go'aannada dalkooda ku saabsan ay u gaaraan bulshada rayadka ah, dowladda iyo hay'adaha deeqda bixiya si ay xil isaga saaraan inay wax u qabtaan dadka saboolka ah si ay u xaqiijiyaan ka fa'ideysi siman oo ay bulshada rayadku hesho.

Ujeeddooyinka Hay'adda PANE

Ujeeddooyinka guud ee hay'addan pane ay leedahay waa kuwan hoos ku xusan:

- ✓ Dhiirragelinta in la dajiyo barnaamijyo dadka saboolka ah wax loogu qaban karo
- ✓ Suurta gelinta bulshada rayadka ah hab firfircooni leh inay uga qayb qaataan dejinta barnaamijyada, hirgelintooda, dabagalka iyo qiimeynta barnaamijyadaasi.

- ✓ Xoojinta bulshada rayadka ah sidi ay kaalin muhiim ah uga geli lahayd si ay codkooda u gaarsiiyaan qaybaha kala geddisan ee dejiya barnaamijyada oo ay dhibaatooyinka bulshada rayadka ah haysta ay wax uga qabtaan.
- ✓ Xaqiijinta qaab dhismeed dowli ah oo bulshada rayadka ku dhisan si ay dowladda ay awood ugu hesho inay wax ka qabato dhimista saboolnimada.

Cinwaanka Hay'adda PANE

Hay'adaha Xiriirka silisiladeysan leh ee bulshada rayadka ah ee ka dhaqadhaqaaqa dalkan Itoobiya (PANE)

TEL: +251-011- 663 59 65
+251-011- 663 94 28

FAX: +251-011- 663 96 79
P.O.Box: 2433 CODE 1250
e-mail: pane@ethionet.et
website : www.pane.org.et
Addis Ababa, Ethiopia.